

REPUBLIC OF SOMALILAND
NATIONAL HEALTH PROFESSIONS
COMMISSION



JAMHURIYADDA SOMALILAND
KOMISHANKA QARANKA MIHNADAHA
CAAFIMAADKA

BADDA CAS AREA - HARGEISA, SOMALILAND
Tel: +252-2-571283 / Email: info@nhpcsomaliland.org / Website: nhpcsomaliland.org

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

KOMISHINKA QARANKA MIHNADAHA
CAAFIMAADKA
(NHPC)

HABRAACA IYO SHURUUDAHA DIIWAAN-
GELINTA IYO RUKHSAD SIINTA
MIHNADLAYAASHA CAAFIMAADKA.

Ee ka farcamaya Xeerka Caafimaadka Xeer Lr. 9/2001.

KOMISHANKA QARANKA MIHNADAHA CAAFIMAADKA (NHPC)

Habraaca Diiwaan-gelinta Mihnadlayaasha Caafimaadka.

1. Shuruudaha Diiwaan-gelinta Dhammaan Mihnadlayaasha Caafimaadka.

1.1 Shuruudaha Diiwan-gelinta Mihnadlayaasha caafimaadka ee dal shisheeyo wax ku soo bartay. Kuwaas oo u kala baxaya laba qaybood oo kala ah:

1.1.1 Kuwa aan ahayn Somalilander oo tababarkooda ku qaatay debadda.

1.1.2 Kuwo ah Somalilander oo tababarkooda ku qaatay debadda

Shuruuddan soo socda ayay tahay in laga helo ama ay soo dhammaystiraan dhammaan codsadayaasha dalal shisheeye wax ku bartay si loo xaqiijiyo iyo/ama ujeeddooyinka kale ee loogu baahdo inta lagu guda jiro hawsha diiwaan gelinta.

Si kastaba ha ahaatee, haddii aan la hayn nuqullada asalka ah, sawirka asalka oo Nootaayo soo hubisay ama machad jaamacadeed/mihnadeed waa la aqbali karaa.

- Shahaado Jaamacadeed/Diblooma/Shahaado uu bixiyey machad tababar caafimaad oo la aqoonsan yahay.
- Transcript ka oo uu ka keenay machad tababar oo la aqoonsan yahay.
- Shahaadada Diiwaan gelinta ee Dalka uu ka socdo.
- Shahaadada Dhaqan Wanaaga.
- Raad raaca taariikh nololeedka codsadaha (CV).
- Tixraac uu ka keeno 3 Mihnadle oo ay Wada shaqeeyeen.
- Tixraac uu ka keeno ugu yaraan 2 urur mihnadlayaal caafimaad ah/machad/urur iyo ama/qof uu hore ugu shaqeeyey.
- Caddayn xaqiijinaysa Shaqada uu u Socdo/Goobta Shaqada/Warqadda Martiqaadka.
- **Dadka Takhasuska leh:-**Caddayn muujinaysa Tababar jaamacadeed oo sare oo aan ka yarayn saddex (3) sanno.
- Laba (2) sawir oo cusub oo kur ah (dhabarka sawirrada waa in uu saxeexo machadka ka talo bixinaya/loo shaqeeyaha/ururka)
- Foomka Codsiga Diiwaan gelinta oo dhammaystiran.
- Codsadayaasha waxa loog baahan yahay in ay u fadhiistaan Imtixaanka Guddida ee ku habboon diiwaan gelinta ka hor (qoraal, bukaan ay la kulmaan ama labadaba).
- Caddayn denbi la'aaneed.
- Lacag qabasho caddaynaya bixinta ajuurada codsiga.
- Dhammaan waraaqaha ku qoran af aan Ingiriisi ahayn ama af kale oo ay doorbidayso Guddidu waxa la soo raacin doonaa nuqul sawir ah oo ah turjumaad rasmi ah (oo Ingiriisi ah), taas oo ay caddaysay Nootaayo Sharci ah.
- Codsadayaasha waxa talo lagu siinayaa in ay gudbiyaan foomamka oo dhammaystiran iyo waraaqaha la socda ugu yaraan saddex (3) bilood ka hor, si wakhti loogu helo qiimeynta codsiyadooda.

1.2 Shuruudaha Diiwaan gelinta Mihnadlayaasha Dalka gudahiisa lagu Tabaray.

- Foomka codsiga diiwaan gelinta oo dhammaystiran.
- Shahaadooyinka jaamcada/Diblooma/Shahaado oo la hubiyey.
- Shahaadada Dhammaystirka Waxbarashada oo la hubiyey, muujinaysana dhibcaha uu keenay. (Transcripts)
- Kaadhka aqoonsiga
- baasaaboort.
- Shahaado dugsi sare.
- Lacag qabashada ajuurada codsiga.
- Laba (2) sawir oo kur ah oo cusub (sawirrada dhabarkooda waa in uu saxeeexo machadka talo-bixinta gudbinaya/shaqo bixiye/urur).
- Soo gudbiyaan waraaqaha kale oo loo baahan karo hadba sida uu Komishanku go'aamiyo.
- Laba tixraac oo mihnadlayaal ah.
- Shahaado tababar shaqo (Internship)
- warqadda dhaqan wanaagga oo uu ka keeno Cisbitaalka uu Tababarku ku qaatay.
- Caddaynta denbi la'aanta.

Fiiro Gaar ah: Codsadaha waxa looga baahan yahay in uu keeno asalka shahaadooyinka jaamacada iyo Transcript ka diiwaan gelinta ka hor.

Fiiro Gaar ah: Shuruudaha Diiwaan gelinta Mihnadlayaasha Tababar qabay 1991-kii ka hor:

Shuruudaha diiwaan gelinta waa kuwa kor ku xusan (1.2); si kastaba ha ahaatee, dadka shahaadooyinku ka lumen waxa ay mari doonaan hab hubineedka Ururka Kalkaalisoooyinka iyo Ummulisoooyinka Somaliland (SLNMA) iyo Ururka Dhakhaatiirka Somaliland.